QAYBTA CAAFIMAADKA FAYO-DHAWRKA




# Shuruudaha Maaskarada ee Goobta Daryeelka Caafimaadka Suaalaha Badanaa Laiska Weydiiyo

*(La Cusbooneysiiyay 09-16-2022)*

Hoos waxaa ku qoran jawaabaha Su'aalaha Inta Badan La Isweediiyo (FAQ) ee ku saabsan Sharciga Maamulka Oregon (OAR) [333-019-1011](), Shuruudaha Maaskarada ee Xakamaynta COVID-19 gudaha Goobaha Daryeelka Caafimaad. Su'aalahaan Badanaa La Isweydiiyo (FAQ) ayaa waxaa laga yaabaa in si isdabajooga ah loo cusbooneysiiyo.

*Su'aal cusub ama la cusbooneysiiyay

**S: Shuruudaha maaskarada ee goobaha daryeelka caafimaadka miyaa la qaadi doonaa Maarso 11?**

Maya. Maaskaro wali waa looga baahanyahay goobaha daryeelka caafimaadka ee hoos yimaada OAR 333-019-1011.

**S: Maxaa loo arkaa goob daryeel caafimaad?**

Sida waafaqsan shuruudaha maaskaraha ee sharciga OHA ee goobaha daryeelka caafimaadka (OAR 333-019-1011), goobta daryeelka caafimaadka waxaa loola jeedaa goob walba oo daryeelka caafimaadka, oo ay ku jiraan daryeelka caafimaadka jirka ama dabeecada la gaarsiiyo waxaana ku jiro, laakiin kuma xadidno xarun walba oo daryeelka caafimaadka ama hay'ada shati haysata sida waafaqsan ORS sadarka 441 ama 443, sida isbitaalada, xarumaha qalliinka bukaad-socodka, xarumaha qubeyska, xarumaha daryeelka bukaa-jiifka ee gaarka ah, xarumaha daryeelka daran ee muddada dheer, xarumaha baxnaaninta bukaan-jiifka, xarumaha daryeelka caafimaadka ee guriga, xarumaha kaalkaalinta, xarumaha daryeelka waayeelka, xarumaha la deggan yahay, xarumaha la deggan yahay ee caafimaadka dhaqanka, daryeelka caafimaadka hoyga, daryeelka guriga, farmashiyeyaasha, daryeelka caafimaadka lagu bixiyo guriga, gudaha gawaarida ama aaggaga kumeelgaarka ah (tusaale ahaan, rugaha caafimaadka ee guur-guura, ambalaansyada, gaadiidka sugan, gawaarida gaadiidka degdegga aan ahayn ee caafimaadka (NEMT) iyo daawoyinka jidka lagu bixiyo), iyo xarumaha bukaan-socodka, sida xarumaha kelyo sifeynta, xafiisyada bixiyaha daryeelka caafimaadka, xafiisyada daryeelka caafimaadka ee dhaqanka, xarumaha daryeelka degdega ah, xafiisyada la-talinta, xafiisyada bixiyo daawada bilaashka ah iyo kale sida irbadaha, daaweynta, nidaamka daaweynta kale, daaweynta xubnaha iyo daaweynta kale ee murqaha, iyo xarumaha ku takhasusay waxyaabaha kale.

**S: Yaa loo tixgeliyaa inay yihiin shaqaalaha daryeelka caafimaadka?**

Sida waafaqsan shuruudaha maaskaraha ee sharciga OHA ee goobaha daryeelka caafimaadka (OAR 333-019-1011), shaqaalaha daryeelka caafimaadka waxaa laga wadaa shaqsiyaadka, mushaarka la siiyay ama aan la siin, shaqeynayo, baranayo, daraasadeynayo, caawinayo, kormeerayo ama ku tabarucayo shaqo goobta daryeelka caafimaadka ee siineyso daryeelka tooska ah bukaanka ama deganayaasha ama leh filashada gaarista tooska ah ama aan tooska aheyn bukaanada, dagayaasha, ama waxyaabaha cudurka laga qaado, oo ay ku jiraan laakin kuma xadidno shaqsi walba ee ka diiwaangashan guddiga sharciyeynta caafimaadka sida midaas lagu qeexay ORS 676.160, daryeelayaasha aan shatiyeysneyn, iyo karaaniga, cuntada, adeegyada deegaanka, dhar dhaqida, amniga, injineernimada iyo maareynta xarumaha, maamulka, biilka, ardayga iyo shaqaalaha iskaa wax u qabsiga.

**S: Haddii bixiyeyaasha daryeelka caafimaadku ay ku bixinayaan daryeelka caafimaadka goob aan ahayn goobta daryeelka caafimaadka oo hoos timaada qaanuunka OHA, sida fasalka ama qolka jimicsiga, goobtaasi miyay noqotaa goob daryeel caafimaad?**

Maya. Qeexitaanka goobta daryeelka caafimaadku waa mid ballaaran, balse waxaa loogu talagalay in lagu dabaqo goobaha sida caadiga ah daryeelka caafimaad looga bixiyo, ama goobaha kumeelgaarka ah sida rugaha guurguura ama ambalaasyada. Intaa waxaa dheer, ururadu waxay u magacaabi karaan aagagga ama qolalka xarumahooda sidii goobo daryeel caafimaad oo goobahaasi waxay noqon doonaan goobo daryeel caafimaad oo hoos yimaada qaanuunka OHA.

**S: Goobta daryeelka caafimaadku miyay ku jirtaa qayb ka mid ah xarumaha daryeelka caafimaadka ama xafiiska caafimaadka, ama dhismo uu maamulo daryeel bixiye ama nidaam caafimaad oo aan bukaan iyo daryeel caafimaad lagu bixin?**

Haddii bixiyaha xanaanada caafimaadka ama nidaamka caafimaad uu leeyahay dhismo kaligiis ah oo aan daryeel caafimaad la bixinin oo bukaannadana aan loo ogolayn inay galaan, looma tixgelin doono goob daryeel caafimaad. Haddii ay jirto qayb ka mid ah goobaha caafimaadka ama xafiiska caafimaadka oo aan lagu bixin daryeel caafimaad, bukaanna aan loo ogolayn oo jir ahaan ka soocan meelaha bukaannada loo oggol yahay ama lagu bixiyo daryeelka caafimaadka, oo leh gidaaro dabaq ilaa saqafka ah iyo albaab aan la furin marka aan la isticmaalin, booskaas looma tixgelin doono goob daryeel caafimaad. Haddii shakhsiyaadka loo oggolaado inay joogaan goobahan aan daryeelka caafimaadka ahayn iyagoon haysan maaskaro, daboolka wejiga ama gaashaanka wejiga, waa inay wali xidhaan maaskaro, dabool weji ama gaashaan weji meel kasta oo ah goob daryeel caafimaad. Xeerka Oregon OSHA ee loogu talagalay goobaha khatarta gaarka ah (437-001-0744) way ka duwanaan kartaa qeexitaanka OHA ee ku aadan daryeelka caafimaadka, shaqa-bixiyeyaasha waxaa lagu dhiiragelinayaa inay aqoonsadaan haddii sharciga Oregon OSHAs uu khuseeyo.

**S: Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee u shaqeeya wakaaladaha daryeelka guriga ee shatiga leh, wakaaladaha caafimaadka guriga ee shatiyaysan, iyo wakaaladaha bukaannada dhimanaya ee shatiyaysan miyay tahay inay xidhaan maaskaro ama dabool waji marka ay daryeel ku bixinayaan guriga gaarka ah ee shaqsiga?**

Haa. Sababtoo ah daryeelka guriga dhexdiisa, wakaaladaha caafimaadka guriga iyo bukaannada dhimanaya ayaa lagu daray qeexida 'goobta daryeelka caafimaadka' shaqsiyaadka ka shaqeeya daryeelka guriga ee shatiga leh, caafimaadka guriga, ama wakaaladaha bukaannada dhimanaya waa inay xidhaan maaskaro ama dabool weji ah marka ay bixinayaan adeegyada bukaanada ama macaamiisha si waafaqsan siyaasadaha wakaaladooda iyadoon loo eegin meesha ay ka bixinayaan daryeelka.

**S: Haddii lagu hayo daryeel gurigeyga gaarka ah, shaqsi ka shaqeeya daryeelka guriga dhexdiisa, caafimaadka guriga ama hay'adda bukaannada dhimanaya, miyaan ku qasbanahay inaan xidho daboolka wejiga marka ay gurigayga yimaadaan si ay u bixiyaan daryeel?**

Waxay ku xiran tahay bukaan kasta/macmiil kasta inuu go'aansado haddii ay rabaan inay xirtaan maaskaro gurigooda gaarka ah, xitaa haddii ay daryeel caafimaad ka helayaan gurigooda. Bukaanka/macmiisha guriga lagu xanaaneeyo waa inay xidhaan waji-xidho marka ay qaadanayaan daryeelka haddii iyaga ama qof ka mid ah qoyskooda uu qabo difaac daciif ah ama uu khatar ugu jiro cudur daran, ama haddii qof qoyska ka tirsan aanu la socon tallaallada COVID-19. Bukaan-socodka/macmiilku waa inay sidoo kale xidhaan maaskaro marka uu waydiiyo daryeelaha caafimaadkooda.

**S: Goobta daryeelka caafimaadku miyay ku jirtaa xarumaha waayeelka ama meelo nololeed oo madaxabanaan?**

Maya. Xarumaha waayeelka ee aan bixin adeegyada daryeelka caafimaadka oo ku shaqeeya goob madadaalo looma tixgeliyo goobo daryeel caafimaad. Goobaha nololeed ee madaxbannaan looma tixgeliyo goobo daryeel caafimaad. Goobaha kale ee mulkiilaha ama hawlwadeenku way sii wadi karaan dhaqangelinta iyo hirgelinta hagista maaskarada, waji daboolka iyo gaashaanka wajiga, iyo shuruudaha kala fogaanshaha jireed hadba sida la quman. Marka daryeelka guriga, daryeelka caafimaadka guriga, ama adeegyada hospice lagu bixiyo tas-hiilaadka nololeed ee madax-bannaan, bixiyeyaasha waa inay wali xidhaan maaskaro ama daboolka wajiga sida waafaqsan OAR 333-019-1011.

**S: Goobta daryeelka caafimaadka miyay ku jirtaa goobaha sida guryaha xanaanada dadka waaweyn?**

Qaar ka mid ah xarumaha ay ruqsada siisay Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon (ODHS) waxaa laga dhaafay sharciga OHA ee u baahan ku dhex xirashada maaskarada goobaha caafimaadka, sida guryaha xannaanada dadka waaweyn, guryaha xannaanada dadka qaba naafanimada lagu dhasho, guryaha tababarka deegaanka, iyo xarumaha tababarka deegaanka, laakiin ODHS waxay dejisay shuruudo u gaar ah oo ku aaddan xirashada maaskarada oo loogu talagalay qaar badan oo ka mid ah goobahan.

Wixii ku aadan shuruudaha waji daboolaha, booqo https://www.oregon.gov/dhs/COVID-19/Pages/LTC-Facilities.aspx.

**S: Goobta daryeelka caafimaadku miyay ku jirtaa qaybta farmashiyaha ee dukaanka tafaariiqda?**

"Goobta" farmashigu waa goob daryeel caafimaad laakiin maaha dukaanka tafaariiqda oo dhan. Haddii uu ku yaallo farmashiye gudaha dukaanka tafaariiqda, meelaha soo socda ee la xidhiidha farmasiga ayaa loo arkaa goob daryeel caafimaad:

- Aag kasta oo shaqaalaha farmashigu ay ku hawlan yihiin hawlaha farmashiyaha, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn diyaarinta dawooyinka, la falgalka bukaanka, iyo maamulida tallaalada.
- Meel kasta oo ay bukaan-socodyadu ku sugayaan inay kula falgalaan shaqaalaha farmashiyaha, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn safka sugitaanka ama meel uu u qoondeeyay farmashiyaha goob sugitaan.
- Aag kasta oo uu bukaanku kula falgalayo shaqaalaha farmasiga, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn qeybta dhigidda ama qaadashada dawo ama la talinta farmashiistaha.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ka yimid Guddiga Farmashiyaha ee Oregon ee ku saabsan shuruudaha farmashiyaha, halkan guji.

**S: Miyuu farmashiyaha "dadka gaarka ha u adeego", sida farmashiiyaha boostada ama farmashiyaha goob xafiis oo aan si toos ah ugu adeegin ama aan ula falgalin dadweynaha ama bukaanka goob daryeel caafimaad?**

Haddii farmashiyuhu uu ku yaalo dhismo keligiis ah ama goob xafiis oo ku dhexyaal dhisme halkaas oo aan dadweynaha ama bukaanka aan si toos ah loogu adeegin ama lagula falgelin, looma tixgelin doono goob daryeel caafimaad.

Haddii farmashigu ku yaallo qayb ka mid ah xarumaha daryeelka caafimaadka ama xafiiska caafimaadka oo ah goob daryeel caafimaad oo aan dadweynaha ama bukaannada aan si toos ah loogu adeegin ama lagula falgelin gudaha farmashiyaha "aagga" oo muqaal ahaan ka soocan meelaha bukaanka loo oggolyahay ama daryeelka caafimaadka lagu bixiyo, iyada oo gidaarada laga bilaabo sagxadda ilaa saqafka iyo albaabka xiran yahay marka aan la isticmaalayn, goobtaas looma tixgelin doono goob daryeel caafimaad.

**S: Miyaa miiska dhaqtarka indhaha uu yahay goob daryeel caafimaad oo tafaariiqle ah oo marka dhaqaatiirta indhaha iyo macaamiisha looga baahan yahay inay maaskiyo ku xirtaan goobtaa?**

Maya. Miisaska dhaqtarka indhaha ee yaala goobaha tafaariiqda ma ahan goobo daryeel caafimaad. Si kastaba ha ahaatee, dhaqaatiirta qora dawada indhaha iyo dhaqaatiirta qalliimada indhaha xafiisyadooda waa goobo daryeel caafimaad oo waxaa loo baahan yahay in maaskiyo lagu dhex xirto. Haddii miiska dhaqtarka

indhaha uu dhex yaalo xafiis dhaqtar, maaskiyo ayaa loo baahan yahay in la xirto markii miiskaa lajoogo maadaama uu dhex yaalo goob caafimaad.

**S: Miyaa xarumaha adeegyada dagaanka ah ee dib u habaynta habdhaqanka (BRS) loo baahan yahay inay u hoggaansamaan sharciga maaski xirashada ee caafimaadka ee Maamulka Caafimaadka Oregon?**

Maya. Xarumaha deegaanka ah ee BRS waa laga dhaafay u hoggaansamidda sharciga goobaha caafimaadka ee maaski xirashada ee OHA, OAR 333-019-1011, sababtoo ah xaruma noocaas ah waxaa shati siisa Waaxda Adeegyada Aadanaha (ODHS) halka ODHS ay leedahay sharuudaha maaski xirashada oo u gaar ah. xarumaha dagaanka ah ee BRS waxaa ay la mid yihiin goobaha kale ee ODHS shati siisay ee sida gaarka ah looga dhaafay maaski xirashada marka loo eego sharcigaan.

Xarumaha dagaanka ah ee BRS waa in ay hirgaliyaanistaraatiijiyado sare loo qaaday oo looga hortago COVID-19markiiCOVID-19 Heerkiisa Bulshadu **uu dhexdhexaad yahay ama uu sarreeyo,** ama markiisababaha heerka xaruntu **muujinayaan halis sii korortay.**

**Fiiro gaar ah**: Xarumaha ODHS shatiga siisay waxaa loo adeegsanayaa sharciga OHA ee maaski ku xirashada goobaha caafimaadka sida ayada oo aysan ku koobnayn xarumaha daryeelka mudada dheer iyo xarumaha nolosha la caawiyo.

**S: Xafiisyada la-taliyayaasha xirfadleyda ruqsada haysta ee ku jira shaqada gaarka ah ma loo tixgaliyaa goobo daryeel caafimaad oo ma hoos yimaadaan hagidda maaskaro ee xafiisyada daryeelka caafimaadka?**

Haa. Goobaha lagu bixiyo adeegyada caafimaadka habdhaqanka ayaa loo tixgaliyaa goobo daryeel caafimaad.

**S: Xarumaha soo kabashada ama goobaha lagu bixiyo adeegyada caafimaadka habdhaqanka, sida adeegyada la-talinta iyo daawaynta ma loo tixgeliyaa goobo daryeel caafimaad?**

Haa, goobaha lagu bixiyo adeegyada caafimaadka habdhaqanka waa loo tixgaliyaa goobo daryeel caafimaad.

**S: Maxay tahay sababta shuruudda ku xirashada afxirka goobaha daryeelka caafimaadka ay u khuseeyaan noocyo badan oo ah goobaha daryeelka caafimaadka ah, oo ay ku jiraan goobaha caafimaadka habdhaqanka?**

Afxirka ayaa qayb muhiim ah ka ah dhimista kiisaska COVID-19, isbitaal dhigista iyo dhimashada. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka waxay halis dheeraad ah ugu jiraan u-baylah noqoshada COVID-19 iyadoo ay jirto in la qaadsiin karo dad badan maalintii oo dhan iyo suurtagalnimada gudbinta cudurka dadka astaamaha lahayn. Intaa waxaa dheer, goobaha daryeelka caafimaadku waa goobo ay inta badan ku nool yihiin dadka qaba xaalado hore oo caafimaad, oo ay ku jiraan xaaladaha caafimaaadka habdhaqanka, oo halis bay ugu jiraaan jirro aad u daran oo ka timaada COVID-19. Xeerka OHA wuxuu bixiyaa badbaado ballaaran ee loogu talagalay

bukaannada, booqdayaasha iyo hawlwadeenada jooga noocyo badan ee goobaha daryeelka caafimaadka ee gobolka ah.

**S: Haddii aan ka shaqeeyo xarun nololeed oo muddada dheer ah, miyay tahay inaan xidho maaskaro markaan shaqada joogo?**

Haa. Xarumaha nolosha la caawiyo, xarumaha daryeelka deegaanka iyo xarumaha kalkaalinta ee ay shatiga siisay Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon ayaa loo tixgaliyaa goobo daryeel caafimaad waxayna hoos yimaadaan sharciga waji-xidhka.

**S*: Miyaa rugaha caafimaadka ee lagu bixiyo adeegyada WIC loo tixgaliyaa inay yihiin goobo daryeel caafimaad ayna ku xiran yihiin sharuudaha xirashada maaski?**

Haa. Rugaha caafimaadka ee WIC waa goobo daryeel caafimaad oo hadaba waxay ku xiran yihiin sharuudaha sharciga. Waxaa arrinkaan kujira meesha macaamiishu ku sugayaan inay adeeg helaan ama ay la hadlaan shaqaalaha WIC.

**S: Xafiiska daawaynta duugista ah ma loo tixgaliyaa goob daryeel caafimaad oo ma waafaqsan shuruudaha maaskarada?**

Waxbay ku xirantahay. Qeexitaanka goobta daryeelka caafimaadka waa mid ballaaran, balse waxaa loogu talagalay in lagu dabaqo goobaha sida caadiga ah daryeelka caafimaad looga bixiyo, ama goobaha kumeelgaarka ah sida rugaha guurguura ama ambalaasyada. Qaar ka mid ah goobaha ay dabiibayaasha duugista ay ku sameeyaan duugista waxay u badan yihiin goobaha daryeelka caafimaadka, balse kuwa kale ma ahan. Tusaale, goobaha duugista ee ku dhex yaala gudaha goobaha kale ee daryeelka caafimaadka sida xafiiska dhakhtarka ama xafiiska irbado ku daaweynta jirka waa goobo daryeel caafimaad waxayna hoos yimaadaan shuruudaha maaskarada. Goobaha adeegyada quruxdu ma ahan goobo daryeel caafimaad oo aaggaga duugista ee goobaha adeegyada quruxdu ma hoos yimaadaan shuruudaha maaskarada. Dhaqannada duugista ee aan ku jirin goobaha daryeelka caafimaadka waxay u baahan karaan bixiyeyaasha, booqdayaasha iyo macaamiisha inay xidhaan maaski.

**S: Xeerka maaskaraha bixiyaha daryeelka caafimaadka miyuu ka shaqeeyaa rugaha caafimaadka xoolaha?**

Maya. Sharcigu wuxuu khuseeyaa goobaha caafimaadka. Rug kashaqeysa caafimaadka xoolaha ma ahan goob daryeel caafimaad sidaas darteedna sharcigu ma khuseeyo dhakhaatiirta xoolaha ee daryeelka ku bixiya goobaha daryeelka xoolaha.

**S: Maxay OHA uga qaaday waajibinta maaskarada dugsiyada iyo meelaha dadwaynaha ee gudaha dhismayaasha oo aysan ku jirin goobaha daryeelka caafimaadka?**

Joogtaynta maaskarada ah oo qayb ka ah xeeladaha lakabka ee yaraynta ah ayaa muhiim u ah goobaha daryeelka caafimaadka. Shaqaalaha daryeelka caafimaadku waxay halis dheeraad ah ugu jiraan u bayla noqoshada COVID-19 sababo la xiriira

nooca iyo goobta shaqadooda. Shakhsiyaadka leh kiisaska la xaqiijiyay ama looga shakisan yahay COVID-19 waxay inta badan ka raadsadaan daryeel goobahan. Intaa waxaa dheer, goobaha daryeelka caafimaadku waa goobo ay inta badan ku nool yihiin dadka qaba xaalado hore oo caafimaad oo halis bay ugu jiraaan jirro aad u daran oo ka yimaada COVID-19. Maaskarada, oo ay la socdaan xeeladaha kale ee yaraynta waxay ilaalinaysaa dhammaan bukaannada, bixiyeyaasha iyo shaqaalaha iyo ilaalinta taageerada bulshada guud.

**S: OHA ma bixiyaa calaamad ay ku qoran yihiin shuruudaha maaskarada si goobaha daryeelka caafimaadka loogu dhejiyo?**

Haa. OHA waxay ku bixisaaa calaamaha linkigan.

**S: Haddii si buuxda la ii tallaalay oo xoojiye aan qaatay, weli miyaa layga baahanyahay inaan xirto maaskaro hoos yimaada sharciga OHA?**

Haa.

**S: Haddii aan ka shaqeeyo xarun caafimaad oo dugsi-ku-salaysan, miyaa layga rabaa in aan xirto maaskaro sida sharciga OHA ee shegaya?**

Haa. Xarumaha caafimaadka ee dugsiga ku salaysan (sida lagu qeexayOAR 333-028-0200 ilaa 333-028-0250) waa goobo daryeel caafimaad sidaa darteed maaskiyo ayaa looga baahan yahay shaqaalaha daryeelka caafimaadka, bukaanada iyo booqdayaasha goobahan. Intaa waxaa dheer, xirashada maaskarada ayaa loo baahan karaa iyada oo loo hogaansamaayo sharciga OR-OSHA ee ku saabsan khatarta gaarka ah (OAR 437-001-0744) ee ku aadan xaaladahaas uu xeerka daboolayo. OHA waxay calaamad ku bixisaa halkan hoosta “calaamadeynta” kuwaas oo laga yaabo in lagu dhejiyo goobaha daryeelka caafimaadka

**S: Haddii aan ahay kalkaaliyaha caafimaadka ee iskulka, ama xubin shaqaale oo bixiya adeegyada hoos yimaada kalkaalisada dugsiga, miyaa layga rabaa in aan xirto maaskaro marka aan ku bixinayo adeegyada goobta daryeelka caafimaadka dugsiga?**

Haa. Kalkaaliyaha dugsiga, iyo shaqaalaha dugsiga, ardayda, iyo martidha waxa looga baahan yahay inay ku xirtaan maaskaro aagaga dugsiga ka mid ah ee buuxiya qeexitaanka goobta daryeelka caafimaadka sida ku cad OAR 333-019-1011(6)(d). Tan waxa ku jiri kara qolka caafimaadka ee dugsiga, booska is go'aaminta, goobta daryeelka caafimaadka maskaxda ama dabeecadda, iyo meelaha kale ee loo qoondeeyay bixinta daryeelka caafimaadka.

**S: Haddii aan ahay kalkaaliyaha caafimaadka ee iskuulka, ama xubin shaqaale oo bixiya adeegyada hoos yimaada kalkaalisada dugsiga, miyaa layga rabaa in aan xirto maaskaro marka aan ku bixinayo adeegyada goobta daryeelka caafimaadka ee fasalka?**

Xeerka OHA uma baahna maaski gudaha fasalada sababtoo ah fasaladu maaha goobo daryeel caafimaad. Aagagga dugsiga oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn fasallada, goobaha jimicsiga iyo garoommada ciyaaraha maaha goobo daryeelka caafimaadka. Maaskarada waxaa looga baahan yahay oo kaliya xeerka

OHA ee qaybo ka mid ah dugsiga oo si gaar ah uu dugsigu ugu qoondeeyey goob daryeelka caafimaadka. Si kastaba ha ahaatee, OHA waxay kula talisaa bixiyeyaasha inay tixgeliyaan dabeecadda hawsha daryeelka caafimaadka marka ay go'aaminayaan inay xirtaan maaskaro, xitaa marka aysan ku jirin goobaha daryeelka caafimaadka. Intaa waxaa dheer, dawladda hoose, degmooyinka, ama maamulayaasha dugsiyadu waxay la qabsan karan inay qaataan shuruudaha xirashada irashada ee meelaha aanay khusayn shuruucda OHA iyo shakhsiyaadka meelahas jooga waa inay u hoggaansamaan shuruudaha deegaanka. Xirashada maaskarada ayaa sido kale loo baahan karaa iyada oo loo hogaansamaayo sharciga OR-OSHA ee ku saabsan khatarta gaarka ah (OAR 437-001-0744) ee ku aaddan xaaladahaas ku cad xeerka.

Maamulayaasha dugsiga waa inay la shaqeeyaan kalkaaliyayaasha caafimaadka ee dugsiga iyo shaqaalaha caafimaadka dugsiga ee ku habboon si ay u gartaan aagagga dugsiga ee buuxinaya qeexitaanka goobta daryeelka caafimaadka ee ku cad OAR 333-019-1011(6)(d).

OHA waxay calaamad ku bixisaa halkan hoosta “calaamadeynta” kuwaas oo laga yaabo in lagu dhejiyo goobaha daryeelka caafimaadka

**S: Ma maaskaro ayaa looga baahan yahay bixiyayaasha caafimaadka dhimirka ee dugsiga, sida bixiyayaasha dugsiga ka shaqeeya ama bixiyayaasha bulshada ku salaysan ee bixiya adeegyada caafimaadka maskaxda ama dhaqanka ee goobaha daryeelka caafimaadka?**

Haa. Bixiyeyaasha, shaqaalaha, martidha iyo bukaanada aya looga baahan yahay inay ku xirtaan maaskaro goobta daryeelka caafimaadka. La-talinta tacliinta maahan daryeel caafimaad oo la-talinta tacliinta maaha goobo daryeelka caafimaadka.

**S: Haddii aan ahay qof u sharciyeysan Guddiga Hab-dhaqanka iyo Heerarka Macallimiinta (TSPC), sida la-taliyaha dugsiga ee ay shatiyeysay-TSPC, shaqaalaha bulshada ee dugsiga, ama dakhtarka cilmi-nafsiga ee dugsiga, miyaa meelaha loo qoondeeyay ee aan ku bixiyo adeegyada loo tixgelinayaa sida goobaha daryeelka caafimaadka ee hoos yimaada sharciga OHA?**

Maya, waa ilaa adeegyada la bixiyo ay hoos yimaadaan sharciga OHA. Xeerka OHA ma khuseeyo adeegyada tacliinta. Xeerka OHA wuxuu u baahan yahay maaskiyo goobaha "ay daryeelka caafimaadka (ay ku jirto daryeelka caafimaadka dabeecadda) lagu bixiyo" iyo "shakhsi ka shaqeeynaya goob daryeel caafimaad oo bixisa daryeelka bukaanada ama deganayaasha, ama si toos/aan toos aheyn u la kulmo bukaanka, deganayaasha, ama agabka wax faafiya. ” OAR 333-19-1011(6).

**S: Ma looga baahan yahay waji-xirada bixiyayaasha caafimaadka dugsiga oo bixiya adeegyo khaas ah (tusaale, daawaynta jidhka, daawaynta shaqada, saamaynta hadalka iyo luuqada) ee goobaha daryeelka caafimaadka?**

Haa. Bixiyeyaasha, shaqaalaha, martidha iyo bukaannada waxaa looga baahan yahay inay ku xirtaan maaskaro goobaha daryeelka caafimaadka.

**S: Haddii hababka hawada-abuura (AGPs) lagu bixiyo fasalka, markaa fasalka ma loo tixgelin goob daryeel caafimaad?**

Maya. Si kastaba ha ahaatee, OHA waxay si adag ugu talinaysaa in AGP-yada lagu sameeyo qol gaar ah, oo ka fog ardayda kale iyo shaqaalaha, iyo in bixiyayaasha xirtaan maaskaro marka ay samaynayaan AGP-yada. Guji halkansi aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan la shaqaynta ardayda qaba baahiyaha cakiran iyo dadweynaha u baahanaya xiriir dhow.

**S: Maaskaro ma looga baahan yahay bixiyeyaasha caafimaadka dhimirka ee xarunta sixitaanka ee bixiya adeegyada caafimaadka maskaxda ama dhaqanka ee goobaha daryeelka caafimaadka?**

Haa. Bixiyeyaasha, shaqaalaha, martidha, macaamiisha iyo bukaanada waxaa looga baahan yahay inay ku xirtaan maaskaro goobaha daryeelka caafimaadka.

**S: Haddii aan ahay bixiye caafimaad xarunta sixitaanka carruurta, ama xubin shaqaale ah oo bixiya adeegyo hoos yimaada jihada bixiyaha caafimaadka, miyaan la iga rabaa in aan xidho maaskaro marka aan bixinayo adeegyada unug guri ama meel kale oo kambaska ah oo aan ahayn goobta daryeelka caafimaadka?**

Guud ahaan, maya. Xeerka OHA uma baahna xirashada maaskiyada qaybaha guryaha sababtoo ah waaxyada guryuhu maaha goobo daryeel caafimaad. Aagagga xarunta sixitaanka ee carruurta oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, waaxaha guriyeynta, fasallada, jimicsiga, dhismayaasha maamulka, iyo meelaha bannaanka ah maaha goobo daryeel caafimaad ilaa ay xaruntu u qoondayso aagga goob daryeel caafimaad. Maaskarada xirashadeeda waxaa looga baahan yahay kaliya qaanuunka OHA ee qaybo ka mid ah kambaska kuwaas oo ah goobaha daryeelka caafimaadka sida xafiisyada caafimaadka iyo meelaha gaarka ah ee goobaha daryeelka caafimaadka. Si kastaba ha ahaatee, OHA waxay kula talisaa bixiyeyaasha inay tixgeliyaan dabeecadda hawsha daryeelka caafimaadka marka ay go'aaminayaan inay xirtaan maaski, xitaa marka aysan ku jirin goobaha daryeelka caafimaadka marka ay bixinayaan daryeelka. Intaa waxaa dheer, dawladda hoose, degmooyinka, ama maamulayaasha dugsiyadu waxay la qabsan karan inay qaataan shuruudaha xirashada maaskiga ee meelaha aanay khusayn shuruucda OHA iyo shakhsiyaadka meelahas jooga waa inay u hoggaansamaan shuruudaha. Maaskarada sidoo kale waxaa loo baahan karaa iyadoo la raacayo sharciga OR-OSHA ee goobaha shaqada ee khatarta gaarka ah (OAR 437-001-0744).

**S: Maaskaro miyaa looga baahan yahay barnaamijyada deegaanka ee ay ruqsada siisay Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon (ODHS)?**

Xarumaha qaarkood ee ka heysta shati ODHS waa laga cafiyay sharciga OHA ee u baahan ku xirashada maaski gudaha goobaha daryeelka caafimaadka, sida guryaha haya dadka waa weyn, guryaha haya naafada korriimada, guryaha tababarka ee deganaashaha ah iyo xarumaha tababarka ee deganaashaha ah, laakiin ODHS waxay sameysatay sharuudahooda oo u gaar ah ee ah ku xirashada maaskiga in badan oo goobahaa ka tirsan. Haddii xarunta shatiga haysata ee ODHS aan laga dhaafin sida ku xusan OAR 333-019-1011(4) oo ay haddii kale waafaqdo qeexida

goobta daryeelka caafimaadka, markaas shuruudaha xirashada maaskiga ayaa lagu dabaqaa.

**Helitaanka dukumiintiga:** Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Qeybta Xiriirrada ee COVID-19 lambarka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.